



Nidaamka Aqoonsiga Early Achievers

Maxay yihiin: Sharciga Bilawga Hore ee 2015 waxa uu dhigayaa inay aqbalaan aqoonsiga dalka oo dhan Early Achievers kaas oo buuxiya shuruudo gaar ah sida u-qalmidd darajaynta Early Achievers.

Ayo: Dhammaan daryeel-bixiyayaasha carruurta ee si buuxda aqoonsi uga haysta hay'adaha si rasmi ah ay u aqoonsadeen Kooxda Dib-u-eegista Aqoonsiga Early Achievers. Wakhtigaan, dhamaan hay'adaha si rasmi ah loo aqoonsaday waa: Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta (National Association for the Education of Young Children, NAEYC), Ururka Qaranka ee Daryeelka Carruurta Qoyska (National Association for Family Child Care, NAFCC) iyo Ururka American Montessori (American Montessori Society, AMS).

Goorma: Aqoonsigu waxa uu noqon doonaa wakhtiga xog ururinta iyo qiimaynta darajada Early Achievers. Nidaamkani wuxuu kaliya saamayn doonaa darajaynta la sameeyey wixii ka danbeeyay Julaay 16, 2017. Baraha la darajeeyey ee aqoonsiga ka qaatay hay'ado la aqoonsan yahay waxay mutaysan doonaan dhibcaha waafaqsanaanta aqoonsiga darajayntooda xigta ee la muddeeyey, dib-u-qiimayn ama darajayn dib-u-cusboonaysiin.

Waayo: Nidaamka aqoonsiga Early Achievers waxay aqoonsadaan daryeel-bixiyayaasha ka qaybgalaya ee muujiya inay ka go'an tahay tayadu kaas oo ay ku gadhayaan nidaamka aqoonsiga.

Sidee: Kaqaybqaatayaasha u-qalma waxay ku heli doonaan shan dhibcaha aqoonsiga ah darajayntooda, iyo sidoo kale Qaybta Aqoonsiga ee Taqasuska Shahaadadooda Early Achievers. Si ay ugu qalmaan dhibcaha aqoonsiga, daryeel-bixiyayaashu waa inay:

- Haystaan shahaado wakhtigan ah, oo la caddeeyey oo laga helay hay'ad la aqoonsan yahay.
- Kaqaybgalaan xog ururinta si buuxda, oo ay kamid tahay qiimaynta duwaanada, iyo inay buuxiyaan shuruudaha muhiimka ah ee ERS iyo CLASS.

Su'aalaha Badanaa La Is-weydiiyo

Xaruntayda la aqoonsan yahay hore ayaa loo qiimeeyay. Wali miyaan u qalmaa dhibcaha aqoonsiga?

Barnaamijyada ay aqoonsadeen hay'ado ay aqoonsan yihiin Waaxda Waxbarashada Hore way u qalmaan dhibcaha aqoonsiga iyo aqoonsiga darajaynta xigta ee la muddeeyey, darajaynta lagu celinayo ama darajaynta la cusboonaysiinayo. Nidaamka aqoonsigu ma aha mid laga noqon karo. **Laakiin, kaqaybgalaha daryeel-bixiyaha la darajeeyey waxa uu dalban karaa Aqoonsiga Aag Gaar ah ee Taqasuska, taas oo ah shahaado aqoonsi oo xarunta u qalanta boosta loogu soo dirayo. Si aad u**

dalbato Aag Gaar ah, fadlan nuqul shahaadada wakhtigan ah ugu soo dir iimeylka Early Achievers QRIS@del.wa.gov.

Barnaamijka aqoonsiga xaruntaydu kuma jiro liiska hay'adaha aad aqoonsan tihiin. Nidaamkani muu i qabanayaa aniga?

Wakhtigan maya. Tijaabada aqoonsigu waa uu aqoonsan yahay NAEYC, NAFCC iyo AMS inay waafaqsan yihiin shuruudaha Early Achievers ee in la aqoonsado barnaamijyo. Nidaamka arjigu wuu u furan yahay dhammaan hay'adaha aqoonsiga. Fadlan la xidhiidh hay'addaada aqoonsiga si aad u aragto haddii ay bilaabeen Arjiga Early Achievers ee Aqoonsiga Hay'adda.

Waxaan ahay daryeel-bixiye AMS aqoonsan tahay waxaan isku diyaarinayaa darajaynta. Maxay tahay inaan sameeyo si aan u helo dhibcaha aqoonsiga iyo Aagga Gaarka ah?

Waa inaad muujisaa in xaruntaada lagu aqoonsaday Qalabka U-diyaarsanaanta Darajaynta Isdhexgalka (IRRT) oo aad la timaaddaa shahaado la aqoonsan yahay oo wakhtigan ah oo ay qiimeeyaan cidda macluumaadka ururinaysaa. Dhibcaha aqoonsiga waxaa si otomaatig ah loogu dari doonaa dhibcahaaga darajaynta ee ugu danbeeya.

Waxa la i aqoonsaday wakhtigii ugu danbaysay ee la i darajeeyey laakiin wakhtigan la ima aqoonsana. Iyada oo sidaa ay tahay dhibcaha ma heli karaa?

Barnaamijkaaga wakhtigan waa in la aqoonsan yahay wakhtiga darajaynta si aad ugu qalanto dhibcaha aqoonsiga. Haddii aad go'aansato inaad dib u cusboonaysiin ku samaysato aqoonsigaaga, waxaad u qalmi doontaa dhibcahan darajaynta wakhtiga xiga.

Shanta dhibcood may khuseeyaan qiimaynta aagga gaarka ah?

Maya. Dhibcahan waxaa loogu talagalay inay ahaadaan aqoonsiga dadaalkaaga iyo ballanqaadka tayada inta uu socdo nidaamka aqoonsigu. Waxaa lagu dari doonaa dhibcaha guud ee barnaamijkaaga.

Waxaan ahay daryeel-bixiye NAEYC aqoonsan tahay kaas oo lagu darajeeyey Heerka 2. Waa maxay sababta la ii siin waayay dhibcaha aqoonsigu?

Si aad ugu qalanto dhibcaha aqoonsiga, waa inaad heshaa dhibcaha ugu yar ee CLASS iyo ERS. Haddii aad hesho dhibcaha ugu yar wakhtiga dib-u-darajaynta waxaad heli doontaa dhibcaha aqoonsiga wakhtigaas.

Waxaan wakiil u ahay hay'ad aqoonsi bixisa taas oo aan ku jirin liiska DEL ansixisay. Siday hay'addaydu u noqon kartaa hay'ad la aqoonsan yahay?

Arjiga Aqoonsiga Hay'adda ayaa jira kaas oo loogu talagalay hay'adaha aqoonsiga qaranka kuwaas oo ugu yaraan saddex sano shaqaynayay oo maamulo ugu yaraan 100 goobood oo la aqoonsan yahay oo gobollo badan ku yaala, oo ay kamid tahay Washington. Arjiga waxaa laga dalban karaa iimeylka Early Achievers ee QRIS@del.wa.gov.